

1

Akhri bayaannada ku jira lifaaqan ee ku saabsan tartannada aad ka codeynayso.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga adigoo isticmaalaaya qalin midab kasta ah.



3

Saxiix bakhshaddaada. Saxixaagu waa inuu u dhigmo saxiixa aan ku hayno diiwaankaaga diiwaan gelinta codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.



4

Warqaddaada codbixinta wakhti hore soo celi. Haddii aad isticmaalayo sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codeey!




5

Ka raad-raac warqaddaada codbixinta halka [kce.wiki/TrackMyBallot](#). Waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto in warqaddaada codbixinta la tiriay, codkaagana la maqlay.



Sida loo

codeeyo!



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?



Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Istimmaalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.


OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.



Sida loo istimmaalo Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka [kingcounty.gov/elections/obmp](#).
- Macluumaaqdaa gelo foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- AMA
- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama aadsoo marsiinaaya boostada.
- Lagacta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.

Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqyeasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828



Doorashada Gaarka ee Febraayo 2025

Degmada King Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Deegaanka ee Rasmiga ah

sida ay codsadeen Magaalada Seattle iyo Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1



Saxiixo si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor halka [kce.wiki/TrackMyBallot](#).

Is diiwaan gelo si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo [VoteWA.gov](#) si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeyta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 3.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta halka [kce.wiki/VoterReg](#) oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 3.



Shakhsii ahaan: Wuxaan shakhsii ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa halka xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 11, Maalinta Doorashada. Wixii macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa halka [kingcounty.gov/elections](#).

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Barro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, xarumaha codbixinta, iyo in ka badan!



Waxaan halkaan u joognaa in aan caawino!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawini kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma rabtaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta [kingcounty.gov/elections/obmp](#) si aad uga faa'iidaysto Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta waxaa ku duuban macluumaa muhiim ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta, helitaanka caawinaadda, iyo wax dheeraad ah. Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka eego:

- Shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow
- Halkee laga heli karaa caawinaad shakhsii ahaanneed
- Sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada lunto ama burburto.

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
[@kcelections](https://www.kcelections.org)
[f](https://www.facebook.com/KingCountyElections) [i](https://www.instagram.com/kcelections/) [in](https://www.linkedin.com/company/king-county-elections/) [y](https://www.youtube.com/@KingCountyElections)

King County
Elections

codeyn!

Magaalada Seattle

Soo Jeedinta Lambarrada 1A iyo 1B

Soo Jeedinta 1A (oo ay soo gudbiyeen Codsiga Hindisaha Lr. 137) iyo Soo Jeedinta 1B (mid beddelaad ah oo ay soo jeediyeen Golaha Seattle iyo Duqa Magaalada) ayaa khuseeya maalgelinta kharashka canshuurta mushahar bixinta oo loogu talagalay Horumariyaha Guriyeynta Bulshada.

Soo Jeedinta 1A ayaa waxay canshuur ku soo rogi doontaa kharashyada mushahar bixinta ee loo-shaqeeyayaasha ka ganacsada Seattle. Heerka canshuurtu wuxuu noqon doonaa 5% oo ku aaddan magdhogwa sannadlaha ah ee ka sareeya \$1,000,000 ee shaqaale kasta laga siiyo gudaha Seattle. Dakhliga ka soogala ayaa taageeri doona Horumariyaha Guriyeynta Bulshada, oo ah hey'ad horumarinneed oo dadweyne oo loo abuuray horumarinta, lahaanshaha, iyo dayactirk guryaha bulshada ee Seattle. Canshuurta la soo rogay ayaa noqon doonta mid lagu sii doro canshuurta kharashka mushahar bixinta ee Magaalada ee lagu soo rogay Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle Cutubka 5.38.

Si beddel ahaan, Golaha Magaalada Seattle iyo Duqa Magaalada ayaa soo jeidiyay Soo Jeedinta 1B (Xeerka 127101), kaas oo qoondelyn doona \$10,000,000 oo ka mid ah dakhliyada canshuurta kharashka mushahar bixinta ee hore u jira ee shanta miisaaniyad sannadeedka ee soo socota si loo maalgeeliyo Horumariyaha Guriyeynta Bulshada. Dakhliga ka soo baxa ayaa wuxuu taageeri doonaa helitaanka iyo horumarinta guriyeynta bulshada ee Seattle. Horumariyaha waa inuu cadsadaa oo uu buuxiyaa shuruudaha qaarkood sida ay go'aamisay Magaaladu ka hor inta aan lacagta la bixin. Haddii kharashka loo qoondeeyay aan lagu bixin saddex sanno gudhood laga bilaabo markeedii ugu horeysay ee la qoondeeyay, waxay diyaar u yihiin inay taageeraan mashaariicda kale ee guryaha la awoodi karo.

1. Ma tahay in cabbirradaan midkood loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

2. Iyada oo aan loo eegin inaad halka kore ku codeysay haa ama maya, haddii mid ka mid ah cabbirradaan loo hirgeliyo sharci ahaan, midkee bay noqon lahayd?

Soo Jeedinta 1A

Soo Jeedinta 1B

Qoraalka cabbirkan oo dhammaystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 6.

Shuruudaha ansixinta: Su'aasha 1 - aqlabiyad fudud; Su'aasha 2 - cabbirka hela tirada codadka ugu sareeya (Sharciga Magaalada Seattle, qodobka IV, qaybta 1(G))

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Magaalada Seattle

Bayaanka sharaxaadda

Cabbirkan wuxuu codbixiyeyaa u soo bandhigayaa laba su'aaloood oo ku saabsan maalgelinta canshuurta kharashka mushahar bixinta ee ku aaddan Horumariyaha Guriyeynta Bulshada, maamulka horumarinta dadweynaha ee hore loogu aasaasay oggolaanshaha codbixiyaha ee Hindisaha 135 ee Febraayo 2023. Horumariyaha waxa loo abuuray in uu horumariyo, lahaanshaha, iyo ilaalinta guriyeynta bulshada Seattle.

Su'aasha ugu koowaad waxay tahay in la qato mid ka mid ah labada hindise oo beddelka ah, labadaba waxay ku lug leeyihiin maalgelinta Horumariyaha ee dakhliga ka soo baxa canshuurta kharashka mushahar bixinta. Su'aasha labaad waa labadaan soo jeedin midkee ayaa la hirgeliyya.

Haddii codbixiyeyaa shu ay su'aasha koowaad si aqlabiyad ah ugu codeeyaan "Maya", markaa ka dib soo jeedinta midkoodna lama aqbali doono. Haddii codbixiyeyaa shu ay su'aasha koowaad si aqlabiyad ah ugu codeeyaan "Haa", markaa ka dib soo jeedinta hesha tirada badan ee codadka ee su'aasha labaad ayaa la aqbali doonaa. Codbixiyeyaa shu waxay u codeyn karaan su'aasha labaad iyada oo aan loo eegin codkooda su'aasha koowaad.

Soo Jeedinta 1A

Soo Jeedinta 1A waxay canshuur cusub ee kharashka mushahar bixinta ku soo rogi doontaa loo-shaqeeye kasta oo ka ganacsada xadka magaalada Seattle. Caddadka canshuurta waxaa loo xisaabin doonaa 5% wadarta guud ee magdhogwa sannadlaha ah oo ka badan \$1,000,000 ee la siyo shaqaale kasta oo Seattle. Canshuurta ayaa noqon doonta mid lagu sii doro canshuurta kharashka mushahar bixinta ee Magaalada ee lagu soo rogay Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle Cutubka 5.38. Ugu yaraan 95% dakhliga canshuurta ayaa loo qoondelyn doonaa oo loo wareejin doonaa Horumariyaha. Qoondelyn ugu badan ee sannadlaha ah ee lagu maamulayoo canshuurta waa 5% dakhliga canshuurta ama \$2,000,000, hadba kan hooseeya.

Kuwa soo socdaa ayaa laga dhaafi doonaa canshuurta: (1) Shaksi kasta oo ah qandaraas madax-banaan oo magdhogwiisa sannadlaha ah uu ka badan yahay \$1,000,000 lagu doro canshuurta uu bixiyo ganaci kale; iyo (2) ganacsiyada laga dhaafay canshuurta ee ay ka dhaafeen magaalooyinka sida waafaqsan qaunuunyada federaalka ama gobolka.

Soo Jeedinta 1B

Soo Jeedinta 1B waxay qoondelyn doontaa \$10,000,000 oo ah kharashyada canshuurta kharashka mushahar bixinta ee hore u jira shanta miisaaniyad sannadeed ee soo socota si loo maalgeeliyo Horumariyaha. Dakhliga waxaa loo isticmaali karaa kharashka iibka, dhismaha, ama dib u habeynta guryaha bulshada, marka laga reebo in maalgelinta loo isticmaali karo oo keliya kharashyada deganeyaasha guryaha ilaa 80 boqolkii ba dakhliga dhex dhixaadka ah ee aagga. Ilaa iyo 5% ee lacagta loo qoondeeyay waxaa laga yaabaa in uu isticmaalo Horumariyaha si uu ugu bixiyo kharashkeeda maamulka.

Horumariyuhu waa inuu shaqaaleeyaa sarkaalka fulinta iyo madaxa sare ee maaliyadda, oo uu muuijyaa inuu leeyahay xakamayn maaliyadeed oo ku filan, sida uu go'aamiyay Agaasimaha Xafiiska Guriyeynta, ka hor inta aan la helin maalgelinta mashaariicda guryaha.

Haddii lacagaha loo qoondeeyay mashaariicda guriyeynta aan lagu abaalmarin Horumariyaha saddex sanno gudhood laga bilaabo qoondeyntoodii ugu horeysay, lacagta ayaa laga dhigi doona mid diyaar ah iyadoo loo raacayo habka caadiga ah ee Magaalada ee maalgelisa mashaariicda kale ee guryaha la awoodi karo.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Polly Grow

Anshaxa iyo Doorashooyinka Seattle
(206) 615-1248
polly.grow@seattle.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Frank Chopp, Sharon Lee, Nick Licata
info@houseourneighbors.org

Seattle waxa soo food saartay dhibaato guryo la awoodi karo iyo hoy la'aanta oo aan kala joogsi lahayn. Iyada leh tirada dadka oo si xawli ah u sii koraaya iyo qiimaha maciishadda oo aad u kordhaysa, qaar badan oo naga mid ah ayaa qiimaha awged bulshadeena uga dhex baxaya. Way caddahay in qalabka hadda jira ee abuurista iyo ilaalinta guriyeynta la awoodi karo aanay ku filnay. Soo Jeedinta 1 waxay gacan ka geysan doontaa wax ka qabashada dhibaatadaan iyadoo ururinaysa lacag ay Horumariyaha Guriyeynta Bulshada Seattle (SSHD) u isticmaali doonaan abuurista iyo dayactirk guri bulsho oo ay dadweynuhu leeyihiin, si joogto ah loo awoodi karo, dakhli isku dhafan oo Seattle ah.

Guryaha ay abuurto SSHD iyada oo loo maraayo Soo Jeedinta 1A waxay ahaan doonaan guryo la awoodi karo oo joogto ah. Guryahaan la heli karo, la awoodi karo, deegaanka u fiican, ay sameeyaan shaqaale urur, guryaha tayada sare leh waxay diyaar u yihiin kiraysteyaasha soo gala dhammaan dakhliyada kala duwan - oo ay ku jiraan bareyaasha, shaqaalahaa daryeelka caafimaadka, bixiyeeyaa xanaanada carruurta, kuwa dakhligoodu go'an yahay, iyo bulshooyinka la takoorro ee laga yaabo inay sidoo kale ay barakacaan. Muhiimad ahaan, abuurista guryo badan ayaa ka caawin doonta hoos u dhigidda qiimaha guryaha ee qof kasta.

Codbixiyeyaa shu ayaa laga dhaafi doonaa canshuurta: Seattle waxay abuureen SSHD bishii Febraayo 2023 ayagoo si weyn ugu codeeyay hindisaha 135. Laakiin, cabbirka kuma aysan jirin ilo dhaqaale sababtoo ah in sidaas la sameeyo waxay ku xad gudbi lahayd "xeerka halka mawduuc" ee gobolka ee ku aaddan hindisooyinka. Ku codee Haa ee Soo Jeedinta 1 (iyo 1A) si aad u maalgeliso Horumariyaha Guriyeynta Bulshada Seattle.

Aan dhisno Seattle halkaas oo qof kastaa awoodi karo inuu ku noolaado oo uu ku horumaro.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Mucaaradku waxay ku dooddayaan in aanan wax ka qaban dhibaatada awood-u-helidda guryaha ee dhammaan reer Seattle. Waan khilaafsanhay -- in badan oo ka mid ah deriskeena ayaa la halgamaaya, magaaladeena waxay luminaysaa bulsho aad u badan oo ka dhigaysa mid weyn.

Wakaalad degmeed ahaan, oo ay abuureen codbixiyeyaa shu, Horumariyaha Guriyeynta Bulshada Seattle waxaa ka shaqeeyaa oo ay hoggaamiyaan khabirro ku taqasusay hantida ma-guurtada ah, horumarinta guriyeynta, qaab dhismeedka, iyo maalgelinta guriyeynta dadweynaha -- dhammaantood diyaar u ah inay shaqo tagaan dhismaha guriyeynta bulshada.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka looga soo horjeedo

Alice Woldt, Roger Valdez, George Howland Jr.
georgehowlandjr@gmail.com

Taageerayaasha guriyeynta bulshada ayaa sheegaaya in ay soo dejinayaan jihada "horusocodka" ee siyaasadda guriyeynta. Dhab ahaantii, guriyeynta bulshadu waxay u hagi doontaa ilaa 100 milyan oo doolarkeena canshuurta xaddidan si loogu dhiso guri dadka dakhligoodu sareeyo oo ah ilaa \$126,000 sannadki.

In ka badan 12,000 oo qof ayaa guri la'aan ku ah Seattle habeen kasta. 30,000 oo kale waxay halis ugu jiraan inay waayaan guryahooda kor u kaca kirada iyo duminta darteed. Dakhli kasta oo cusub oo canshuureed waa inuu ku socdaa caawinaadda dadka runtii saboolka ah. Tobanka sanno ee ugu horeeya guryaha bulshada, u doodeyaasha waxay rabaan in si gaar ah loo awoodi karo, dakhli isku dhafan oo Seattle ah.

Laba sanno ka hor, taageerayaasha guriyeynta bulshada ayaa ballan qaaday inay abuurayaan mashaariic hadda laga maalgelin lahaa iibinta curaarta iyo kirada laga qaado unugyadooda. Taa beddelkeeda, waxba ma ay samayn. Intaa waxaa dheer, u doodeyaasha guriyeynta bulshada waxay rabaan inay lacagtaan oo dhan siyaan hey'ad bilow ah oo aan caddeyn, Horumariyaha Guriyeynta Seattle, oo aan xitaa weligood dhisin hal guri oo keliya.

In ka badan laba darsan oo hey'ado aan faa'iido doon ahayn oo leh diiwaan la xaqiijiyay oo ah dhisidda guriyeynta dadka saboolka ah ee Seattle oo ah tobanaan sannadood oo dheer. Taasi waa meesha ay malaayiintaan u baahan yihiin inay tagaan. Ku codee "Maya" si aad u joojiso labada tallaabo ee taxaddar la'aanta ah inay noqdaan sharci.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Marka ay timaado dhibaatada guriyeynta Seattle, waxaan u baahanahay xalal wax ku ool ah. Horumarinta guriyeynta la awoodi karo ayaa ah hawl aad u farsamo ah, ahna hawl adag. Soo Jeedinta 1 waxay bixin doontaa ilaa \$52 milyan oo doolar canshuureed sannadki, si joogto ah, urur aan la dooran, khibrad la'aan ah oo aan la heli karin, Horumariyaha Guriyeynta Bulshada. Soo Jeedinta 1 kuma jirto kormeer, wakhti ama natijjooyin loo baahan yahay ee kuwan horumarinta guriyeynta.

Soo Jeedinta 1 waa khatar aysan Seattle awoodin.

ka sii socda bogga xiga ➔

Magaalada Seattle

Bayaanka lagu taageerayo Soo Jeedinta 1A

Rebecca Saldaña, Robert Cruickshank, Tammy Morales
info@houseourneighbors.org

Soo jeedinta 1A waxay canshuurtaa ganacsiyada ugu hantida badan si loo abuurro sanduuq u go'an Horumariyaha Guriyeenta Bulshada Seattle (SSHD) si ay u fuliyaan waajibaadkooda ee codbixiyuhu ansixiyay. Magaaladu waxay ku qiyastay Soo Jeedinta 1A inay u ururin doonto \$50 milyan sannadkii SSHD si ay u abuerto guryo bulsho oo la awoodi karo, si guud loo leeyahay, dakhli isku dhafan ee guriyeyn bulsho.

Waxaan ku nool nahay mid ka mid ah magalooyinka ugu qanisan adduunka, laakiin dhammaan reer Seattle kama faa'iideystaan hantidaas. Soo jeedinta 1A waxay caqabod ku noqotaa kala duwanaanshaha, iyada la hagayo kheyraadka ganacsiyada ugu qanisan ee SSHD si loo dhiso keyd guri oo ay awoodi karaan dhammaan reer Seattle.

Dakhligaan loo qoondeeyay wuxuu abuuri doonaa in ka badan 2,000 oo unug, oo ay ku jiraan unugyo qoys, guryo bulsho 10-ka sanno ee soo socda. Soo jeedinta 1A waxay hubin doontaa in kalkaaliyeasha, macallimiinta iyo bareyaasha, dab-damiska iyo fanaanniinta ay awoodi karaan inay ku noolaadaan Magaaladeena. Soo jeedinta 1A waxay ay siinaysaa Seattle qalab cusub oo ay kula dagaalanto xasaradaha la awoodi karo ee guriyeenta oo ay fuliso waajibaadka ay abuureen codbixiyeyashu markii ay abuureen SSHD. Soo jeedinta 1A waxay si dhab ah u qaadataa dhibaataada guriyeynta waxayna maalgelin doontaa qaab caalami ah oo la xaqiijiyay.

Soo jeedinta 1B si dhab ah uma qaadanayso dhibaataada guriyeenta. Soo jeedinta 1B waxay hoos u dhigtaa canshuuraha ganacsiyada hodanka ah waxayna caburisaa guryaha bulshada.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo Soo Jeedinta 1B

Soo Jeedinta 1B waxay \$10 milyan ka qaadaysaa guryaha la awoodi karo iyo adeegyada muhiimka ah si canshuuraha ganacsiyadeena ugu qanisan loogu hayo kuwo hooseeya. Wuxuu lahaataa dugsiyo dadweyne oo wanaagsan. Canshuurtaan muhiimka ah ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Canshuuraha Hawlgallada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle. Ansixinteeda waxay muhiim u tahay bixinta waxbarasho tayo leh ku dhawwaad 50,000 oo arday oo hadda diiwaan gashan.

Abuuritaanka dib u dhac badan iyo xafiis-dowlad maaha dariiqo looga baxo dhibaataada guriyeenta. Waa sida aan markii hore halkan ku nimid. Waa in aan ku dhaqaqnaa xowliga iyo miisaanka dhibaataadaan ay u baahan tahay.

Bayaanka lagu taageerayo Soo Jeedinta 1B

Al Levine, Maria Barrientos, Lisa Nitze
peopleforresponsiblesocialhous@gmail.com

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad 1B ugu codeyso *Haa* si loo taageero maalgelinta guriyeynta bulshada oo ay la socoto la xisaabtan iyo hufnaan iyo inaad 1A ku codeyso *Maya* taasoo abuuraysa canshuur cusub oo bixinaysa \$50 milyan sannadkii, *si abad ah*, oo siinaysa hal hey'ad oo aan weligood dhisin hal unug oo guri ah.

Waxaynu u baahanahay guryo la awoodi karo oo dheeraad ah iyo isla xisaabtan, laakiin Hey'adda Horumarinta Dadweynaha (PDA) waxaa la abuuray oo keliya 2023 waxayna isticmaashaa fikrad aan la xaqiijin oo ah dhisidda iyo maamulidda guryaha. Guryo bulsho weligeed laguma tijaabin Seattle waxaana laga sameeyay hal meel oo kale oo Mareykanka ah. Fikradaan ayaa laga yaabaa in ay faa'iido leedahay, laakiin ma keenni kartaa guryo qimahooda u dhigma \$50 milyan sannad kasta markii aysan waxba soo gudbin?

Waxaan taageernaa guriyeynta la awoodi karo waana sababta aan u taageerno Soo Jeedinta 1B si ay u bixiso \$10 milyan sannadkii oo ah dakhli canshuureedka hore u jira muddo 5 sanno si loo tijaabiyo fikradaa in ay shaqeynayo. Soo Jeedinta 1B waxay ku daraysaa la xisaabtanka iyo shuruudaha warbixinta ee aanay lahayn Soo Jeedinta 1A. Soo Jeedinta 1B waxay u baahan tahay in Xafiiska Guriyeenta Magaalada, oo ah wakaalad guuleysata oo leh 40-sanno oo diiwaan dhisidda kumanaan guri, ay kormeeraan oo ay ka warbixiyaan horumarka guriyeenta bulshada PDA. Fadlan 1B ku codee *Haa*.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo Soo Jeedinta 1A

Markii SSHD la abuuray 2023, isla taageerayaashii 1A waxay yiraahdeen "ma jirto wax kabbid dowlaade oo lagama maarmaan ah". Laba sanno ka dib, waxay rabaan \$50 milyan sannadkii. Waxay yiraahdeen 12% ee guryaha loogu talagalay dadka guri la'aanta iyo dakhliga yar soo gala, hadda waa 3%. Waxayna rabaan in canshuuraha ay kabaan guryaha dadka uu soo galu dakhli ah 120% ee dakhliga dhewe - ma aha deganeyaasha ugu saboolsan.

1A ayaa mar kale waxay kordhinaysaa canshuuraha shaqooyinka iyadoo ay ganacsiyada bartamaha magaalada iyo xaafadaha ay dhibtoonaayaan. U Codee 1B.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1

Soo Jeedinta Lr. 1

Beddelaadda Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Seattle ayaa meel mariy Qaraarka Lr. 2024/25-3 ee khuseeya soo jeedintaan si loo joogteeyo maalgelinta waxbarashada ee hadda jirta. Si loo sii wado barnaamijyada tayada sare leh ee aan gobolku maalgelin ama si buuxda loo maalgelin, tani waxay Degmada u oggolaanaysaa inay qaaddo canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda oo beddelaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso ee dhammaan hantida la canshuuri ee gudaha Degmada:

Sannadaha Ururinta	Qiimaha Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimeynta La Qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2026	\$0.78	\$250,000,000
2027	\$0.75	\$249,000,000
2028	\$0.72	\$248,000,000

sida lagu sheegay Qaraarka, waxay ku xiran tahay xaddidaadyada sharciga ah ee wakhtiga canshuurta. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.

*Shuruudaha ansixinta:
Aqlabiyyad fudud
(Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

Bayaanka lagu taageerayo

Jorge L. Barón, Susie Clark
www.seattleschoolsfirst.org

Fadlan *cusboonaysii* Canshuurtaan muhiimka ah ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Canshuuraha Hawlgallada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle. Ansixinteeda waxay muhiim u tahay bixinta waxbarasho tayo leh ku dhawwaad 50,000 oo arday oo hadda diiwaan gashan.

Magaalo wanaagsan waa inay lahaataa dugsiyo dadweyne oo wanaagsan. Canshuurtaan waxay faa'iido u leedahay duggi kasta oo ku yaal qayb kasta oo Seattle ah. Waxay beddelaysaa canshuurteena hadda jirta waxayna bixinaysaa maalgelin loo baahan yahay si aan u bixino *taageerada waxbarashada ee muhiimka ah* sida waxbarashada STEM, Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada, shaqaalaha amniqa dugsiga, la-taliyeasha, shaqaalaha nadaafadda, barnaamijyada nafafeeynta carruurta, agabyada waxbarashada iyo daraasaad cusub, iyo adeegyada Waxbarashada Gaarka ah. Haddii Canshuurta Hawlgallada aan la *cusboonaysii*, degmadu waa inay samayso jarmo qoto dheer. Macallimiinta iyo kaaliyeasha waxbaridda waa la kala diri doonaa, iyo barnaamijyada qiimaha leh ee ardayda taageera waa la dhimmi doonaa ama la tirtiri doonaa.

"Waxaa halka ah wax wanaagsan oo aan awoodno *Dhammaan* inaan taageerno si aan dugsiyadeena uga dhigno kuwa wanaagsan, gaar ahaan caawinaadda maalgelinta STEM iyo daraasaadka Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada. Fadlan u codee si aad u *cusboonaysii* canshuurtaan! Kheyraadkaas la'aanteed way adagtahay in la qiyaso sida macallimiintu u qabsan karaan shaqadooda. Waad mahadsan tahay." - Susie Clark, macallin ka ah Aki Kurose fasalka 6-aad.

Kani maaha canshuur cusub. Waxay beddelaysaa Canshuurta Hawlgallada ee wakhtigeedu dhammaanayso. Fadlan u codee Haa si aan u *cusboonaysii* ballanteena ku aaddan carruurta Seattle.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka Sharaxaadda

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay codsanayaan ansixinta codbixiyaha ee ah canshuurta Hawlgallada oo ah \$747.0 milyan wadar ahaan oo la ururinayo muddada saddexda sanno ee 2026 ilaa iyo 2028. Canshuurta la soo jeediay aaya beddeli doonta canshuur wakhtigeedu dhacayso.

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 ayaa u oggolaanaysaa canshuuraha in lagu bixiyo barnaamijyada waxbarashada iyo Hawlgallada iyo in la daboolo baahiyaha waxbarasho ee ardayda dhigata dugsiyada degmada. Lacagaha waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo barnaamijyada uusan Gobolka maalgelin ama uusan si buuxda u maalgelin. Lacagta ku jirta iyo midda lagu shubayo Sanduuqa Guud ee Degmada kuma filna inay daboolaan baahiyahaan iyada oo aan la helin lacag dheeraad ah.

Barnaamijyada iyo adeegyada lagu maalgelinayo canshuurta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn: macallimiinta, kaaliyeasha waxbarashada, mushaharaadka shaqaalaha heeraysan iyo kuwa maamulka; agabyada buugaagta iyo fasalka; adeegyada labada luqad iyo waxbarashada gaarka ah; gaadiidka ardayda, badqabka, dayactirka iyo Hawlgallada kale; nashaadaadka ardayga, sida farshaxanka, manhajyada dheeraadka iyo kuwa wadajirka ah; horumarinta xirfadeed iyo tababarka.

Wadarta lacagta la ururin doono waxay noqon doontaa \$250 milyan sannadka 2026, \$249 milyan sannadka 2027 iyo \$248 milyan sannadka 2028. Heerarka canshuurta ee la qiyasay ee ka mid ah \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay waxay noqon doontaa \$0.78 ee ururinta 2026; \$0.75 ee ururinta 2027; iyo \$0.72 ee ururinta 2028. Qiimaha saxda ah ee canshuurta ayaa la hagaajin doonaa iyadoo lagu salaynaayo qiimeynta dhabta ah ee la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada wakhtiga canshuurta.

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato haddii aad u qalanto, wac Qiimeyaha Degmada King (206) 296-7300.

Bayaanka looga soo horjeedo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda cabbirka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Ma jirin sid u soo baxday inay ka mid noqdaan guddiga iyo inay qoraan bayaan mucaadadimo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeysa guddi fadlan la xiriir maamulka xukunka.

Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Soo Jeedinta Lr. 2

Barnaamija Dhisitaanka Heerka Sare (BEX) VI - Canshuurta Raasumaalka

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Seattle waxay codsanayaan ansixinta canshuurta raasumaalka sida lagu sharxay Qaraarka Lr. 2024/25-4. Soo jeedintu waxay beddelaysaa canshuur raasumaal ee wakhtigeedu dhammaanayso waxayna oggolaanaysaa inay qaaddo canshuuraha dherraadka ah si ay u maalgeliso BEX VI ee badqabka iyo amniga, mashaariicda wuxtarka tamarta, dhisitaanka ama dib u cusboonaysiinta ee halka shan dugsi, mashaariicda nidaamyada dhismaha iyo dayactirkha weyn, iyo teknolojiyada iyo mashaariicda kale ee Degmada oo dhan:

Sannadaha Ururinta	Qiimaha Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimeynta La Qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2026	\$0.93	\$300,000,000
2027	\$0.90	\$300,000,000
2028	\$0.87	\$300,000,000
2029	\$0.84	\$300,000,000
2030	\$0.81	\$300,000,000
2031	\$0.79	\$300,000,000

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonlenka barta kingcounty.gov/elections.

Shuruudaha ansixinta:
Aqlabiyyad fudud
(Dastuurka Washington,
qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Stephan Blanford, Dow Constantine, Samantha Fogg
www.seattleschoolsfirst.org

Fadlan ku codee Haa si loo cusboonaysiyo canshuurtaan, taas oo gacan ka geysanaysa hubinta in ardaydeenu nabad qabaan iyo dugsiyadeena si wanaagsan loo dayactiray. Canshuurta Raasumaalka waxay hubin doontaa in dhammaan ardayda iyo macallimiirtu ay helaan jawi waxbarasho oo ammaan ah iyadoo dib u habeyn lagu samaynayo dhismeyaasha oo loogu talagalay badqabka dhul-gariirka, hagaajinta qaylo-dhaanta dabka iyo nidaamyada amniga dugsiga, iyo samaynta maalgeshiyada kale ee amniga ee muhiimka ah. Canshuurtaan waxay sidoo kale bixisaa 90% ee lacagta teknolojiyada, oo ay ku jiraan kombuyutarrada ardayda iyo teknolojiyada fasalka.

Canshuurta Raasumaalka waxay beddelaysaa canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso oo u heellin inay carruurteena u dhisto goobo ammaan ah oo caafimaad leh. Qaar badan oo ka mid ah dhismeyaasha dugsiyadeena aaya ka weyn 50 sanno waxayna u baahan yihiin dayactir ama beddel. Canshuurta Raasumaalka waxay maalgelisaas dayactirkha muhiimka ah iyo dib u habeynta Seattle oo dhan oo ay ku jiraan dhismo waaweyn, dib u habeyn, ama beddelaadda shan dugsi. Arday kasta iyo dugsi kasta aaya ka faa'idaaya! Tani maaha canshuur cusub. Waxay beddelaysaa Canshuurta Raasumaalka wakhtigeedu dhammaanayso. Fadlan u codee si aad u cusboonaysiiso ballan qaadkeena carruurta Seattle.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Bayaanka "ka soo horjeedidda" waa khalad. Naftada u Akhriso qoraalka; ma jiraan wax Soo Jeedinta 2 kaas oo xiri doona macal hal dugsi ama midayn doona dugsiyo. Dhab ahaantii, Prop. 2 waxay ilaalisa, dib u dhisidda oo beddesha dhismeyaasha dugsiyada gaboobay, saqfayada, nidaamyada HVAC, teknolojiyada iyo nidaamyada amniga ee degmada oo dhan.

"Dhammaan carruurta Seattle, ayadoon loo eegin zib koodka, waxay mudan yihiin dugsiyo ammaan ah iyo caafimaad leh iyo teknolojiyada casriga ah. Aynu sii wadno maalgelinta guushooda mustaqbalka." – Senatarka Gobolka Javier Valdez.

Bayaanka Sharaxaadda

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay codsanayaan ansixinta codbixiyaha ee canshuurta raasumaalka oo ah \$1.8 bilyan ee loogu talagalay Barnaamika Dhisitaanka Heerka Sare VI (BEX VI). Canshuurta la soo jeediyay ayaa beddeli doonta canshuur wakhtigeedu dhammaanayso.

Ansixinta Soo Jeedinta 2 ayaa oggolaanaysa in la qaado canshuurta muddo lix sanno ah si loo sameeyo hagaajinnada badqabka iyo amniga ee degmada oo dhan, oo ay ku jiraan qalabka gelitaanka albaabka, kaamirooyinka, hagaajinnada ogeysiiska degdegga ah, iyo sidoo kale horumariinnada xaalladda dhismaha iyo kaabayaasha ee Degmada oo dhan oo ay ku jirto hagaajinnada wuxtarka tamarta, beddelka saqafka, nidaamyada farsamada, dib u habeeyta gudaha iyo dibadda. Maalgelinta canshuurta ayaa sidoo kale dhisi doonta, dib-u-cusboonaysiin doonta, beddeli doonta ama samayn doonta kordhin ilaa shan dugsi, oo ay ku jiraan fasallada waxbarashada shaqada iyo farsamada. Canshuurtu waxay maalgelinasaa qiyaastii 90 boqolkiba ee miisaaniyadda teknolojiyada degmada, oo ay ku jiraan teknolojiyada ardaya iyo tababarka shaqaalaha ee la xiriira si loo hubiyo inaan buuxinno baahiyaha waxbarasho ee hadda iyo mustaqbalka.

Wadarta lacagta la ururin doono waxay noqon doontaa \$300 milyan sannad kasta laga bilaabo 2026 ilaa iyo 2031. Qiyaasta heerarka canshuurta ee ka mid ah \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay waxay u dhexayn doontaa \$0.93 ee ururinta 2026 ilaa \$0.79 ee ururinta 2031. Qiimaha saxda ah ee canshuurta ayaa la hagaajin doonaa iyadoo lagu salaynaayo qiimeynta dhabta ah ee la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada xilliga canshuurta.

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato haddii aad u qalanto, wac Qiimeyaha Degmada King (206) 296-7300.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Dr. Kurt Buttleman
Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Maaliyadda
(206) 252-0086
krbuttleman@seattleschools.org

Bayaanka looga soo horjeedo

Chris Jackins

Seattle waxay jeceshayay dugsiyada. Soo Jeedinta 2 ayaa xiri doonta. Fadlan "Maya" ku codee Soo Jeedinta 2.

Canshuurtaan Raasumaalka BEX waxay dhisaysaa dugsiyo aad u waaweyn si ay u "iskugu daraan" oo ay u xiraan dugsiyada. Taasi maaha mid ay shacabka rabaan. Codso dib u qoridda canshuurta adigoo ku codeynaya "Maya".

Fadlan diid canshuurtaan si Canshuur Raasumaalka oo ka wanaagsan loo qoro oo au la socoto saddex ujeeddo oo kala ah. (1) In dugsiyada lagu hayo kuwo furan oo ifaaya. (2) In qaybo ka mid ah maalgelinta canshuurta Raasumaalka dhinac la dhigo oo la geliyo koontooyinka bangiga si ay u abuuerto dulsaar taas oo sharciga gobolka (RCW 28A.320.320) loo isticmaali karo in lagu caawiyoo miisaaniyadda Hawlgalka Degmada ee kale. (3) In canshuurtaan Raasumaalka ee \$1.8 bilyanka la yareeyo si loo dhimmo canshuuraha oo Seattle looga dhigo meel aad loogu awoodi karo oo ay ku jiraan qoysaka. Taasi waxay noqon lahayd guul, guul, guul.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Fadlan ku codee "Maya" si aad ugu sheegto Guddiga Dugsiga: "Ha Xirin dugsiyada." Ku codee "Maya" si aad u codsato dib u qorista canshuuraha. Waad mahadsan tahay

Magaalada Seattle

Qoraalka buuxa ee Qaraarka 32148

QARAAR ku saabsan Hindisaha 137 ee khuseeya canshuurta mushahar bixinta magdhowga ee dheeraadka ah si loo maalgeliyo Horumariyaha Guriyeenta Bulshada (kaas oo Golaha Magaaladu uu go'aamiyay inaan la hirgelin Sebtembar 19, 2024); u oggolaanaya Karaaniga Magaalada iyo Agaasimaha Fulinta ee Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka inay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si ay awood u siyaan Hindisaha 137 ee la soo jeediyay inuu ka soo muuqdo warqadda codbixinta iyo buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka ee Febraayo 11, 2025 oo ay la socota soo jeedinta Canshuurta Kharashka Mushahar Bixinta (Sharciga Golaha Magaalada 120864), kaas oo ah cabbir beddelaad ah oo la soo jeediyay oo ka hadluya isla mawduuca sida waafaqsan Qodobka Sharciga IV; oo ka codsanaya Agaasimaha Doorashooyinka Degmada King inay Hindisaha 137 ee la soo jeediyay iyo beddelkeeda ku darto warqadda codbixinta ee doorashada bisha Febraayo 11, 2025 sida waafaqsan sharciga lagu dabaqj karo; iyo bixinta daabacaadda Cabbirka Hindisaha ee la soo jeediyay iyo beddelkeeda.

HALKA AY, taageerayaasha u soo gudbiyeen Karaaniga Magaalada codsiga cabbirka warqadda codbixinta oo ku saabsan canshuurta mushahar bixinta ee dheeraadka ah si ay u maalgeliyaan Horumariyaha Guriyeenta Bulshada (kaas oo Karaaniga Magaaladu ku magacaabay inuu yahay Hindisaha Lr. 137 ee Seattle ee ku jira Faylka Karaaniga Lr. 322950); iyo

HALKA AY, Karaaniga Magaaladu u gudbiyay codsiga Agaasimaha Doorashooyinka Degmada King si uu loo caddeeyo in codsiga tiradiisa saxiixyada ay tahay mid sax ah oo ku filan si uu ugu qalmo hordhaca Golaha Magaalada sida ku cad Sharciga Magaalada Seattle Qodobka IV, Qaybta 1; iyo

HALKA AY, Agaasimaha Doorashooyinka Degmada King ay ka caddeyo in Codsiga Hindisaha Lr. 137 uu xambaarsan saxiixyo sax ah oo ku filan si uu ugu qalmo hordhaca Golaha Magaalada sida ku cad Sharciga Magaalada Seattle Qodobka IV, Qaybta 1; iyo

HALKA AY, Sharciga Magaalada Seattle Qodobka IV, Qaybta 1aad waxay dhigaysaa, haddii Golaha Magaaladu aanu hirgelin sharciga hindisaha ama cabbir xambaarsan tiro saxiixyo ku filan, waxay noqon doontaa waajibka Golaha Magaalada inay codbixiyeyaasha Magaalada u gudbiyaan cabbirka hindisaha ansixintooda ama diidmadooda; iyo

